



## **Ciidamada Bada ee Midawga Yurub oo Jabuuti Kula kulmay Ergada Kobcinta Awooda Bad-goboleedka Bariga Afrika**

---

31kii Oktoobar taliyaha Ciidamada Bada ee Midawga Yurub ee hawlgalka Atalanta (EU NAVFOR) Admeral Dhexe Enrico Credendino, waxa uu la kulmay Jacques Launay, oo ah Madaxa Ergada Kobcinta Awooda Bad-goboleedka Bariga Afrika (EUCAP Nestor).

Ergada Kobcinta Awooda Bad-goboleedka Bariga Afrika (EUCAP Nestor) iyo Ciidamada Bada ee Midawga Yurub ee Hawlgalka Atalanta (EU NAVFOR) waxay kulankan dhexdiisii si rasmi ah ugu gar-waaqsadeen in ay bilaabaan is-kaashi firfircoo. Labada ergoba waxay qayb ka yihii aragtiga guud ee Midawga Yurub ee ku aadan Soomaaliya; Ciidamada Bada ee Midawga Yurub ee Hawlgalka Atalanta (EU NAVFOR) waxay la tacaalyaan budhcadbadeeda iyagoo isticmaalaya difaac, ka-hor-tag iyo muquuninba. Halka Ergada Kobcinta Awooda Bad-goboleedka Bariga Afrika (EUCAP Nestor) ay ku hawlantahay ka qaybqaadashada xal waara oo xiligiisu dheer yahay oo ku wajahan budhcadbadeeda iyadoo la taageeraysa horumarinta kobcinta awooda bada ee qaar ka mida wadamada gobolka.

Kobcinta Awooda Bad-goboleedka Bariga Afrika (EUCAP Nestor) waa ergo rayid ah oo ujeedadeedu tahay in la xoojiyo ku dhaqanka sharciga ee Soomaaliya, iyadoo marka hore diirada la saarayo deeganada Buntlaandh iyo Soomaalilaandh, isla-markaana la horumarinayo awooda badadeed ee Jabuuti, Kenya iyo Sishilis.

Intii lagu guda jiray joogitaanka Jabuuti, taliyaha Ciidamada Bada ee Midawga Yurub ee Hawlgalka Atalanta (EU NAVFOR) waxa kale oo uu la kulmay madaxa dhawaan loo magacaabay inuu Midawga Yurub u matalo Jabuuti, Mudane Joseph Silva, halkaasna ay isku waydaarsadeen aragtiyadooda ku aadan doorka Ciidamada Bada ee Midawga Yurub ee Hawlgalka Atalanta (EU NAVFOR) ee la tacaalida budhcadbadeeda gobolka.